

Haggaha Kuhagga Washington Apple Health Dadka Biloowga-ah

Qeybta 2: Sameynta ballantaada koowaad ee daryeelka caafimaadka

Tallaabada 1aad: Raadso daryeel bixiye aasaasi ah

Marka laguugu qoro gudaha qorshaha caafimaadka, waxaad u baahnaa doontaa in aad dooratid daryeel bixiye aasaasi ah, mararka qaarna lagu magacaabo PCP. Adeeg-bixiyahaaga aasaasiga ah waa dhakhtarka, kalkaaliyaha caafimaadka, xirfadlaha daryeelka caafimaadka, ama bukaan-eegtada aad u tagto inta badan daryeelkaaga caafimaadka.

Muxuu muhiim u yahay daryeel bixiyaha aasaasiga ah

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah waa keliya khibrad laha daryeelka caafimaadka aad arki karto, haddii aad tahay qof xanuunsan ama qaadanaysidba daryeel kahortag ah. Haddii aad u baahatid daryeel gaar ah midkaas oo aanan kusiin karin daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah, waxay kugu wareejin doonaan takhasusle.

Xitaa haddii aadan hadda xanuunsanayn, waa muhiim in aad doorato adeeg-bixiyaha daryeelka aasaasiga ah oo aadna qabsato ballantaada koowaad. Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah wuxuu kugu caawin doonaa in aad kahortagtid mushkilado caafimaad mustaqbalka ah iyo in aad sameysid baaritaano joogto ah oo loogu talagalay cuduro gaar ah.

Sid ee loo doortaa daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah?

Haddii aadan dooran daryeel bixiye aasaasi ah, qorshahaaga caafimaadka ayaa mid adiga kuu dooran doona.

Waxaad codsan kartaa PCP ku hadla luuqadaada, ku takhasusay naafonimadaada, ama fahma dhaqankaaga hadayba ku jiraan shabakada qorshahaaga caafimaadka. Waxaad sidoo kale qeexi kartaa haddii aad leedahay jinsi aad doorbidayso oo loogu talagalay PCP-gaaga.

Haddii daryeel bixiyaha aad doonaysid uusan kujirin shabakada qorshahaaga caafimaadka, weydii daryeel bixiyaha qorshaha caafimaadka uu kushaqeeyo. Haddii qorshaha caafimaadka kale uu yahay mid laga heli karo meesha aad kunooshahay, waxaad u bedelan kartaa qorshahaas caafimaadka. **(Fiiri Qaybta 1 ee kamid ah Haggaha Kuhagga Washington Apple Health Dadka Biloowga-Ah (Medicaid) si aad u aragto sida loo bedelo qorshahaaga caafimaadka.)**

Daryeel bixiyahaaga caafimaadka waa in uu noqdaa qof aad agtiisa kudareemaysid raaxo. Haddii aadan kufaraxsanayn ayaga sabab kasta oo ay midaasi tahay, waxaad dooran kartaa daryeel bixiye kale. La xirii qorshahaaga caafimaadka si aad u oggaato sida aad u dooran karto bixiyaha daryeelka aasaasiga ah oo ka duwan.

Haddii uu ku caymiyo Apple Health oo aan lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo, waa in aad raadisaa adeeg-bixiye aqbal Apple Health adigoo adeegsanaya kaarkaaga adeegyada ProviderOne. Ka raadi adeeg-bixiye qandaraas lala galey <https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/>

Tallaabada 2aad: Sameyso ballan

Waxaa khasab kugu ah in aad qabtid ballan si aad u aragtid daryeel bixiye.

Hubi macluumaada uu kuusoo direy qorshahaaga caafimaadka si aad u aragtid sida loo sameeyo ballantaada koowaad. Waa in aad awoodaa in aad ka hesho xogta xiriirka adeeg-bixiyeyaashaada mareegtada qorshahaaga caafimaadka. Ama wac khadka adeega macmiilka qorshahaaga caafimaadka kadibna weydii lambarka teleefooka si aad u sameysatid ballan.

Haddii aad qabtid welwelo ama baahooyin caafimaad oo degdeg ah, waxaa khasab kugu ah in aad awoodid in aad ku aragtid daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah gudaha maalmo yar.

Xitaa haddii aadan qabbin welwelo caafimaad oo degdeg ah, sameyso ballan loogu talagalay baaritaan-guud (sidoo kale lagu magacaabo baaritaan ficnaansho). Waxay qaadanaysaa waqti dheer si loo sameysto ballan loogu talagalay baaritaan-guud, sidaas darteeda dib ha u dhigin.

Haddii aad u baahantahay turjumaan

Haddii Af-Ingiriisku uusan ahayn luuqadda aad doorbidayso ama aad tahay Dhegoole, DhegooleIndhoole, ama qofka Maqalka makugu adag yahay, wax badan ka ogow hca.wa.gov/interpreter-services, tarjumaanno xirfadlayaal ah ayaa loo heli karaa luuqado badan, oo ay ku jiraan luuqadda dadka dhegoolayaasha, oo aadan wax lacag ah ku bixinayn. Marka aad sameysanaysid ballan, u sheeg shaqaalaha soo dhoweynta haddii aad u baahantahay turjumaan. Tarjumaanka wuxuu noqon karaa qof meesha jooga ama qof ka soo hadlaya telefoonka xilliga ballantaada.

Waxaa wanaagsan in la isticmaalo turjumaan khibrad leh halkii aad ka keeni lahayd xubin qoyska katirsan ama saaxiib si uu adiga kuugu turjumo. Turjumaanada khibrada lehi waa kuwo lagu soo tababarey fahanka weeraha loo isticmaalo daryeelka caafimaadka waxayna kugu caawin doonaan in aad sifiican isku fahantaan adiga iyo daryeel bixiyahaaga.

Haddii aad qabtid naafooyin

Haddii aad qabtid naafo dhinaca maqalka ama hadalka ah, dhibaato xiriirka ah, ama daciifnimo dhaqaaqa ah, iska hubso in aad u sheegto shaqaalaha soo dhoweynta waxyaabaha kusaabsan arimahaas marka aad samaysanaysid ballanta. Shaqaalaha soo dhoweynta jooga ayaa kugu caawin doona waxkasta oo nidaamin lagama maarmaan ah.

In laguugu caawiyo gaadiidka

Waxaad xaq u yeellan kartaa caawimaadda gaadiidka ee ballantaada daryeelka caafimaadka. Dalaale gobol oo qandaraas lagala galay dhinaca Maamulka Daryeelka Caafimaadka ayaa kuu habbeyn doona gaadiidka aadka kuugu habboon.

Haddii aad rabto in aad hesho macluumaadka sida loo codsado gaadiidka caafimaadka ee aan degdegga ahayn, booqo

hca.wa.gov/transportation-help.

Bedelaada ballamada

Haddii aad u baahan tahay in aad bedesho ama baajiso ballan, sida ugu dhaqsiiyaha badan ee suuragalka ah u wac bixiyahaaga daryeelka ee aasaasiga ah.

Haddii aadan aadin ballantaada haddana aadan soo sheegin, waxaa meesha lagu lumiyay waqti ballan qaali ah midkaas oo loo adeegsan lahaa bukaan kale.

Tallaabada 3: Diyaar u noqo ballantaada

Sameyso liis ay kuqoranyihiin waxyaabaha aad doonaysid in aad kala hadashid daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah. Daryeel bixiyahaaga wuxuu dulmari karaa waxyaabaha ugu muhiimsan kulankaaga koowaad. Waxaa kuqoran dhammaadka haggahaan liis warbixineed midkaas oo aad isticmaali karto.

Horey u si qaadp liiska dhammaan daawooyinka lagu soo qoray, oo ay ka mid yihiin faytamiinnada, daawo dhireed dheeraad ah, iyo daawooyinka kale ee si caadi ah la iska soo iibsado ee aan u baahnayn qoraal dhakhtareed, xitaa aspirin.

Qor waxkasta oo xasaasiyad ah oo aad kaqabto daawooyinka, cuntooyinka, ama xasaasiyada deegaanka, sida faxalka oo kale.

Keen diiwaanada caafimaadka hore, ay kujirto diiwaanada tallaalida, haddii aad haysatid.

Tallaabada 4: Aad ballantaada

Qof haku raaco

Xur ayaad u tahay in aad hore usoo wadatid xubin qoyska katirsan ama saaxiib. Qofkaas wuxuu kugu caawin karaa in uu kutuso waddada ama keliya in aad wehel kadhigatid. Mararka qaar way wanaagsantahay in aad haysatid qofkale oo dhigaysta waxa uu kuu sheegayo daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah.

Waxaa laga yaabaa in aadan awoodin in aad horey qof u soo wadato haddii aad isticmaalayso adeegyada gaadiidka ee aan degdegga ahayn.

[La xiriir dalaalkaaga gaadiidka si aad wax badan u oggaato.](#)

Ballamaha caruurta

Waalidiinta waxaa loo oggolyahay in ay lajoogaan caruurtooda inta ay kujiraan imtixaanka. Ilmaha kujira da'da kahor-dhallinyaranimada iyo kuwa ah da'da dhallinyaranimada waxay arki karaan daryeel bixiyahooda aasaasiga ah ayaga oo aan waalidkooda lajoogin ama lasoonin. Kala hadal arintaan ilmahaaga iyo daryeel bixiyahooda aasaasiga ah.

Tag meesha xilli hore

U qorsheyso in aad tagtid xafiiska daryeel bixiyaha kahor ballantaada 15 daqiiqo. Iska qor meesha shaqaalaha soo dhoweynta kadibna buuxi waxkasta oo foom ah oo lagu siiyo. Waxaad u baahan doontaa in aad muujiso kaarkaaga adeegyada ProviderOne iyo kaarkaaga aqoonsiga qorshaha caafimaadka. Waxaa lagu weydiin doonaa in aad muujisid Aqoonsi sawir, sida shatida gaariga lagu wado.

La kulan daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah wuxuu baari doonaa caafimaadkaaga guud wuxuuna kaala hadli doonaa waxyaabaha kusaabsan mushkilado kasta oo xiriir la leh-caafimaadka.

Weydii daryeel bixiyaha warqad tilmaamooyin qoran oo kusaabsan waxkasta oo mowduucyada caafimaadka laga hadlay ah inta lagu guda jirey booqashadaada. Waa hagaah in aad weyddiiso adeeg-bixiyahaaga in uu kuugu celiyo wax kasta ee aadan fahmin.

Weydii waxyaabaha kusaabsan daawooyinkaaga

Weydii haddii daawooyinkaaga hadda ahi ay yihiin kuwo laga ceymis geliyay dhinaca qorshahaaga caafimaadka. Haddii aanan laga ceymis gelin, daryeel bixiyahaaga waxaa dhici karta in uu awoodo in uu doorto daawo laceymis geliyay.

U sheeg bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah dhibaatooyin kasta ee laga yaabo in aad ka qabto meHowdications oo su'aalo weyddii intaadan xafiiska ka bixin ka hor.

In aad sameyso baaritaano sheybaar

Bixiyaha daryeelkaaga aasaasiga ah wuxuu dalban karaa baaritaannada shaybaarka. Badanaa waxay qaadataa maalmo yar si aad u heshid natiijooyinka. Weydii inta ay qaadanayso iskana hubso in uu garanayo daryeel bixiyahaaga sida laguula soo xiriiri.

Si aad u sameysid baaritaanada, waxaad u baahnaan kartaa in aad aadid qol gooni ah ama dhismo gooni ah. Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah ama caawiye ayay khasab kutahay in uu kuu sheego waxa aad u baahantahay in aad oggaatid. Haddii aadan hubin oo aadan garanayn, weyddiiso tilmaamooyin in lagu siiyo.

In aad sixixdid foomam gaar ah

Haddii aad u baahan tahay bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah in uu buuxiyo oo uu kuu saxiixo foomam gaar ah, waqti dheeraad ah u oggolow. Way wanaagsantahay in foomka lagu buuxiyo macluumaad aad garanaysid, sida magaca iyo cinwaanka, kahor inta aadan siinin daryeel bixiyaha. Middaan waxay daryeel bixiyaha kucaawineysaa in uu foomka si dhakhso ah u buuxiyo.

Weydii shaqaalaha jooga meesha soo dhoweynta ama caawiyaha waxa kusaabsan qaabka ugu fiican ee loo buuxin karo foomamkaaga iyo inta ay qaadanayso buuxintaas.

Tallaabada 5: Macluumaad kale oo muhiim ah

In aad buuxisid waraaqaha daawada

Khasab kuguma ahan in aad lacag kabixisid qoraalada daawooyinka laga ceymis geliyay dhinaca qorshaha caafimaadka.

La xirii qorshahaaga caafimaadka haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helidda farmashiye iyo buuxinta daawooyinka uu dhaqtarku qoro.

Qaadaashada daawooyinka

Iska hubso in aad raacdid tilmaamaha uu kusiiyay daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah marka aad qaadanaysid daawooyinka. Waa muhiim in aad qaadatid qadarka ama qiyaasta saxda ah, waqtiga saxda ah, iyo qaabka saxda ah. Daawooyinka uma shaqaynayaan si fiican—waxaana laga yaabaa in ay dhibaato kuu gaystaan—haddii aadan u qaadan si sax ah.

Haddii aadan fahmin tilmaamooyinka, weydiiso daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah in uu kuu sharxo.

Iska hubso in aad la dulmartid qoraalada daawooyinkaaga farmashiilaha marka aad kasoo iibsanaasid daawooyinkaaga.

U tagida takhasusle

Hala samaysanin ballan takhasusle illaa aad kala hadashid daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah ama qorshahaaga caafimaadka.

Si aad u aragtid ama ula kulantid takhasusle waxaad u baahantahay in aad kaheshid “oggolaansho hore,” sidoo kale lagu magacaabo “wareejin,” dhinaca daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah.

Waa muhiim in aad raacdid hab socodka qorshooyinkaaga caafimaadka. Haddii aad lakulantid takhasusle keligaaga, adiga oo aan haysan oggolaansho hore, waxaad ku khasbantahay in aad kabixiso lacagta ballantaas adiga jeebkaaga.

Adeegyada dhalmada iyo caafimaadka haweenka

Uma baahnid in aad oggolaansho hore ka hesho bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah si aad u aragto takhtarka dhalmada ama dhakhtarka haweenka (OB/ GYN), hadayba ku jiraan shabakada qorshahaaga caafimaadka.

Baariitaannada joogtada ah ee aad la yeelanayso OB/GYN waa la caymiyay, iyo sidoo kale daryeel kastoo la socosho ah ee loo baahan karo. Shakhsiyaadka uurka leh, daryeelka joogtada ah inta lagu guda jiro uurka waa la caymiyay.

Helida daaweynta caafimaadka maskaxda

Daaweynta dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka sida niyadjabka, walaaca, iyo xanuunka Walbaharka ee ka dhasha naxdinta/Post-Traumatic Stress Disorder (PTSD) ayaa waxaa caymiya qorshahaaga caafimaadka.

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah wuxuu kugu caawin doonaa isku duwida waxkasta oo daryeel caafimaadka maskaxda ah ee aad u baahantahay asaga oo kugu wareejiya ama lashaqeeya daryeel bixiye ku takhasusey caafimaadka maskaxda. Daryeel bixiyaha caafimaadka maskaxda ee kujira shabakada wuxuu go'aansan doonaa halka aad kuqaadanaysid adeegaha soconaya. Wixii kusaabsan booqasho bukaan socod ah ee lasoo booqdo daryeel bixiye caafimaadka maskaxda ah, wac qorshahaaga caafimaadka. Waxaad u baahnaa kartaa in laguugu daaweeyo wakaalada caafimaadka maskaxda bulshada haddii aad qabtid xaalad halis ah oo caafimaadka maskaxda ah.

Helidda adeegyada daaweynta xanuunka isticmaalka maandooriyaha

Adiga uma baahnid oggolaansho hore ama wareejin ka ahaata qorshahaaga caafimaadka. Haddii aad kuqorantahay gudaha Apple Health, ula xirii si toos ah wakaalada daaweynta.

Eeg Diiwaanka Hay'adaha Caafimaadka Habdhaqanka ee Waaxda Caafimaadka si aad u hesho hay'ad daaweyn oo kuu dhow:

doh.wa.gov/sites/default/files/2022-02/606019-BHADirectory.pdf

Waxaad sidoo kale ka waci kartaa Khadka Caafimaadka Dib-u-helidda Washington 1-866-789-1511 ama booqo [warecoveryhelpline.org](https://www.warecoveryhelpline.org).

Khadka Ka-hortagga Isdilka ee Qaranka

Wac ama farriin u dir 988 ama wac 1-800-273-8255 (adeegsadyaasha TTY 1-800-799-4889) si laguugu xiriiriyo la-taliye xirfadle ah oo tababaran oo ku sugan xarunta dhibaataada ee degaankaaga waqti kasta.

Haddii aad u baahan tahay daryeelka saacadaha shaqada ka-dib

Wac bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah si aad u aragto haddii ay bixiyaan daryeelka saacadaha shaqada ka-dib.

Sidoo kale waxaad wici kartaa khadka caawimaada kalkaalista qorshaha caafimaadka shaqeeya 24-saacadood waxaadna weydiisan kartaa waxa aad samaynaysid. Lambarka telefoonka wuxuu ku qoran yahay **Qaybta 1aad**.

Haddii aad u baahantahay daryeel degdeg ah

Waxaa dhici karta in uu kugaaray dhaawac ama qabtid xanuun aan ahayn mid degdeg ah laakiin u baahan daryeel degdeg ah. Laxirii qorshahaaga si aad uga heshid qalab adeega degdega ah gudaha shabakada qorshahaaga. Sidoo kale waxaad wici kartaa khadka caawimaada kalkaalista qorshahaaga shaqeeya 24-saac si aad u heshid tallo.

Xaalada degdega ah

Wac 911 ama booqo qolka xaaladaha degdegga ah ee ugu dhow haddii aad leedahay dhibaato caafimaad oo degdeg ah ama daran ee aad u maleynayso in ay tahay xaalad degdeg ah.

Markaas kadib sida ugu dhakhsiyaha baddan, u wac qorshahaaga caafimaadka una sheeg in ay kugu dhacday xaalad degdeg ah iyo meesha aad kaheshay daryeelka.

Keliya aad qolka xaalada degdega ah ee kuyaala isbitaalka marka ay xaaladaadu tahay mid degdeg ah Ha u aadin qolka xaalada degdega ahi daryeelka caadiga ama joogtada ah. Qolka xaalada degdega ah keliya waxaa loogu talagalay xaaladaha halista ah ee degdega ah.

Rafcaan

Tallaabada ama ficilka aad qaadid marka aad weydiisid qorshahaaga caafimaadka in uu kusameeyo dib u tixgelin ama u eegid adeega la diidey ama lacag bixinta.

Baari-taan

Baaritaan joogto ah oo lagu sameeyo guud ahaan caafimaadkaaga. Sidoo kale lagu magacaabo baaritaan jir, baaritaan ficnaansho, ama baaritaan sannadle ah.

Ceymis ku jirid

Adeegaha iyo dheefaha uu bixin doono qorshahaaga.

Diidis ama ficil

Marka aan qorshahaaga la oggolaanin ama bixinin adeega.

Liiska daawooyinka

Liis ay kuqoranyihiindaawooyinka uu ceymis geliyo qorshahaaga caafimaadka. Sidoo kale lagu magacaabo liiska daawada.

Qorshaha Caafimaadka

Midkasta oo kamid ah shirkadahaan qandaraaska la leh Gobolka Washington si ay u ceymis geliyaan daryeelkaaga caafimaadka: Qorshayaasha Community Health Plan of Washington, Coordinated Care, Molina Healthcare, UnitedHealthcare Community Plan, iyo Wellpoint Washington.

Taariikh Caafimaad

Diiwaano kusaabsan tallaalo, mushkilado waaweyn oo caafimaad ah, daawooyin, iyo xubnaha qoyska kuwaas oo hore u qabey mushkilado waaweyn oo caafimaad ah.

Dhakhtarka daaweynta dabiiciga ah

Adeeg bixiyaha adeegsada habka guud iyo daaweynta aan u baahnayn in jirka aalado la geliyo. Dhakhtarada daaweynta dabiiciga ahi waxay isku dayaan in ay kafogaadaan isticmaalka qaliin iyo daawooyin.

Shabbakada

Xarumaha, daryeel bixiyayaasha, iyo qalabka loo adeegsado qorshahaaga caafimaadka.

Kalkaalisad khibrad leh

Kalkaalisad diiwaan gashan oo si heersare ah u leh khibrad middaas oo soo dhammeysatay koorso shaqo heersare ah iyo waxbarasho caafimaad kabaxsan waxa looga baahanyahay kalkaalisada diiwaan gashan (RN).

Kaaliye takhtar

Xirfadle daryeelka caafimaadka ah midkaas oo shahaado u haysta in uu u qabto daawooyinka sida qayb kamid ah koox hoos imaanaysa jiheynta dhakhtarka.

Daryeelka caafimaadka kahortaga ah

Daryeel caafimaad joogto ah midkaas oo ay kamid yihiin baaritaano, is-hubino, iyo latalin bukaan si looga hortago jirooyinka, cudurada, iyo mushkilado kale oo caafimaadka ah ama in jirada lagu qaado marxalad hore. Middaana waxaa kamid ah ilmo fiican, baari-taano ilmaha iyo qaangaarkaba ah, iyo daryeelka kahortaga dadka waaweyn, sida: naas, qanjir xanuun, iyo baaritaan kansarka mindhicirta ah (baaritaanada naasaha, baaritaanada qanjirada, iyo baaritaan mindhicirta ah).

Bixiyaha daryeelka aasaasiga ah

Dhakhtarka, caawiyaha dhakhtarka, kalkaalisada khibrada leh, dhakhtarka daaweynta dabiiciga ah, ama xarunta caafimaadka taas oo ah daryeel bixiyahaaga caafimaadka aasaasiga ah.

Oggolaansho hore

Marka qorshahaaga caafimaadka oggolaado adeegaha, daaweynta, qoraalka daawada, ama qalab caafimaad raaga midkaas oo caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah. Sidoo kale lagu magacaabo wareejin ama codsi oggolaansho.

Adeeg Bixiyaha

Dhakhtar, dhakhtar ilko, dhakhtar qaliin, caawiye dhakhtar, kalkaalisad khibrad leh, iyo xirfadlayayaal daryeel caafimaad kale, ama xarunta caafimaadka bixisa daryeelka caafimaadka.

ProviderOne

Nidaamka kombuyuutarka midkaas oo u dira Kaararka Adeegaha macamiisha oona maareeya lacag bixinta loogu talagalay daryeelkaaga.

Wareejin

Marka daryeel bixiye aasaasi ah ama qorshaha caafimaadka kuu diro takhasusle. Sidoo kale lagu magacaabo oggolaanshaha hore.

Kaarka adeegaha

Kaarka aad kaqaadatid dhinaca Apple Health midkaas oo tusinaya in aad haysatid ceymis. Sidoo kale lagu magacaabo kaarka ProviderOne Sidoo kale waxaad kaqaadan doontaa kaar Aqoonsi xubin gooni ah dhinaca qorshahaaga caafimaadka.

Takhasusle

Dhakhtar ama xirfadlaha daryeelka caafimaadka ee daaweeya xaalad ama cudurro gaar ah, sida dhakhtarka kansarka (oncologist), ama dhakhtarka daryeelka haweenka uurka leh (obstetrician), ama dhakhtarka lafaha jabey ama dhabark xanuunka (orthopedist).

Baaritaanka ficnaanshaha

Baaritaan guud oo lagu sameeyo caafimaadkaaga. Sidoo kale lagu magacaabo baari-taan, baaritaan jir, ama baaritaan sannadle ah.

Liiska warbixinta ballanta daryeel bixiyaha aasaasiga ah

Halkan waxaa kuqoran liis warbixin kugu caawinaya in aad xusuusatid waxkasta kahor iyo inta lagu guda jiro ballantaada aad la leedahay daryeel bixiyaha.

Magaca adeeg bixiyaha _____

Lambarka telefoonka adeeg-bixiyaha _____
la adeegsado haddii aad soo daahdo, in aad bedesho ballanta, iwm.)

Taariikhda ballanta _____

Waqtiga ballanta _____

Cinwaanka _____

Lambarka qaybta qolalka _____

Sababta ballanta _____

Kala-hadal qolada soo dhoweynta joogto haddii aad u baahan tahay tarjumaan ama in lagaa haqabtiro baahiyada dhaqdhaqaaqa, hadalka, ama cilladha maqalka

Waxyaabaha loo qaato ballanta

Liiska daawooyinka

Liiska xasaasiyadaha

Taariikhda caafimaadka ama diiwaannada

Kaarka Adeegyada (sidoo kale loo yaqaanno kaarka ProviderOne)

Kaarka aqoonsiga qorshaha caafimaadka

Aqoonsiga sawirka leh

Magaca xaaladaha degdegga ah iyo macluumaadka xiriirka

Xubinka qoyska ama saaxiib

Qabanqaabi gaadiidka

Qabanqaabi daryeelka carruurta

Waxyaabaha la weyddiyo ama loo sheego bixiyaha daryeelkaaga aasaasiga ah

1.

2.

3.

Su'aalaha adeeg-bixiyaha daryeelka aasaasiga ah

1. _____

2. _____

3. _____